



**City of Seattle**

Gregory J. Nickels, Mayor

## **Xeerarka Isticmaalka Kombuyuutarada Dadweynaha**

*Magaalada Seattle waxay bixisaa adeega isticmaalka kombuyuutarada ee dadweynaha si loo hubiyo siday dhamaan dadka degaanku u heli lahaayeen adeegyada dawlada iyo khayraadka kale ee daruuruga ah, iyo si loo dhiirgeliyo ka-qaybqaadashada dadweynaha iyo si loo kordhiyo aqoonta tiknoolajiyada.*



*Naga gargaar sii-waditaanka waxtarkan dadweynaha adiga oo raacaya xeerarkan oo ku dhiirgelinaya kuwa kalena si taas oo kale u sameeyaan.*

1. **FAHAM XEERARKA:** Waxaad mas'uul ka tahay akhriska iyo fahamka xeerarkan. Haddii aanad fahmin, weydii qof shaqaale ah si uu kaaga gargaaro. Waxaad ka waci kartaa Waaxda Macluumaadka Tiknoolajiyada 684-0600 ama email [publiccomputers@seattle.gov](mailto:publiccomputers@seattle.gov). Waxugu gargaari doonaa turjubaan afkaaga ah haddii aad codsato.

2. **XEERARKA DHISMAHA AYAA IYANA SAAMEEYA:** Xeerarka Dhaqanka ee saraha magaalada ayaa iyana saameeya isticmaalka kombuyuutarada. Shaqaalaha magaalada ayaa xoojin kara xeerarkaas.

3. **GAL KOMBUYUUTARKA:** Waa inaad gasho "log-on" oo ka baxdo "log-off" kombuyuutarka markaad dhamayso. Taani waa ammaankaaga. Waxay gargaaraysaa sifaynta macluumaadka qof ahaaneed ee laga yaabo inuu kaydsami lahaa kombuyuutarka markaad u adeegsanaysay email ama booqanaysay bogagga internetka.

4. **WAXA JIRA WAQTIYO XADIDAN:** Waxa jira muddo xadidan oo aad isticmaali karto kombuyuutarka. Marka ay dhamaato muddadaadu waainaad u banayso qofka kugu xiga safka inuu isticmaalo kombuyuutarka. Mudnaanta waxa la siin karaa dadka isticmaal kombuyuutarka si ay u helaan macluumaadka dawlada, qabtaan hawlo la xidhiidha shaqo, galaan adeegyada bulshada iyo caafimaadka ama haddii ay u isticmaalayaan waxbarasho iyo ujeedooyin ka qaybgal arrimo madani ah.

5. **KOMBUYUUTARKA WAA LA SHAANDHEEYAY:** Dad badan ayaa isticmaalo sartaan oo ay ku jiraan caruur. Kombuyuutarada waxa loo shaandheeyey si loo hubiyo jawi ammaan ah. Tani waxay xadidi kartaa waxa ku laga heli karo internetka. Macluumaad dheeraad oo la xidhiidha arrinkan waxa laga heli karaa [www.seattle.gov/tech/public.htm](http://www.seattle.gov/tech/public.htm).

6. **KA DHIG JIIDDA NADIIF:** Waa inaad ka dhigo jiidda nadiif. Cunto, cabitaan ama nacnac lama ogola jiidda kombuyuutarada.

7. **HA ISKU-DAYIN INAAD RAKIBTO SOFTWAREKA AMA BEDESHO KOMBUYUUTARKA:** Laguuma ogola inaad bedesho "configuration" kombuyuutarka. Ha ku download-garayn software ama barnaamijyo cusub kombuyuutarka. Haddii aad u malaynayso in barnaamij lagu rakibo, fadlan la xidhiidh shaqaalaha ama [communitytechnology@seattle.gov](mailto:communitytechnology@seattle.gov)

8. **HA U ISTICMAALIN KOMBUYUUTARKAN INAAD KU WAXYEELAYSO KUWA KALE:** Kombuyuutaradan looma isticmaali karo waxyeelaynta ama handaada dadka, laguma diri karo qasin "spam". Laguma wasici karo waxyaabo waxyeelo leh, ama laguma wadi karo hawlo mamnuuc ah.

9. **MA SAMAYNO KAFAALO-QAAD:** Magaaladu ma kafaalo qaadi karto in kombuyuutarada iyo internetku ay mar walba shaqeeyaan. Isticmaalka kombuyuutarada iyo internetka dadweynaha gelitaankoodu adiga lee waayey halistoodu. Magaaladu kama mas'uul aha lumitaanka xogta ama waxyeelo kale oo imaan karta, sida cajald xumaata.

10. **HALISTA INTERNETKU WAXA LEH ADIGA:** Kombuyuutaradani waxay ku siiyaan gelitaanka Internetka. Magaaladu mas'uul kama aha waxa ku jira Internetka.

11. **WAAD WAAYI KARTAA FAA'IIDOYINKAAS HADDII JABISO SHARCIYADAN:** Haddii aad jabiso sharciyada, waa inaad joojiso isticmaalka kombuyuutarada ama waxa lagu qasbi doonaa inaad ka tagto jiidda kombuyuutarka ama sarta. Natiijo kale waxay noqon kartaa tallaabo sharci ah.